

# Caanaha Hooyada ayaa u Fiican Nuunnyaasha Dhiciska ah

**Nuunnyaasha ku dhasha iyaga oo aan sidkoodii u dhamaan waa in lagu hayo qeybta daryeelka dhallaanka. Waxa cunto ahaan ugu fiican waa in ilmaha si fiican loo nuujiyo. Ugu horreyn nuunnuhu ma laha tabar lagu nuujin karo, laakiin waa in loo liso caanaha oo meel loo dhigo ilaa nuunnuhu u baahdo. Nuunnyaasha waxaa caanaha lagu siin karaa suufka dhegaha, in tuubbo sanko ama afka laga sii mariyo oo caloosha toos u loo geliyo ama masaasad.**

## Caanaha hooyada ayaa ah cuntada ugu fiican nuunnyaasha dhiciska ah sababtoo ah:

- Waa caano uga fudud caanaha formula
- Waa caano ay ku kobocdo maskaxda dhallaanka
- Waa caano ka hortaga caabuqyo halis ah
- Caanaha hooyada nuunnaha dhiciska ah waxay u yihiin cunto iyo daawo!

## Sidee bay hooyadu ku yeelan kartaa caano badan haddii uusan nuunnuhu xoog u lahayn in uu caanaha si caadi ah u jaqo?

- Marka uu nuunnuhu ku jiro isbitaalka, waxa ay hooyadu isticmaali kartaa mashiinka caanaha lagu liso.
- Waa in ay hooyadu isticmaasho mashiinka 8 jeer ama ka badan 24-kii saac Waa in ay habeenkii iska listo caanaha. Marka ay hooyadu marar badan iska listo caanaha, sidaas ayey caano badan ku sii yeelaneyso.
- Markaad nuunnaha ugu timaaddo isbitaalka, samee sida xayawaanka "kaagaruuga" ama si ah "shaf-ku-qabasho." Waxaa looga jeedo waa marka aad xabadkaaga toos ugu qabato nuunnaha oo xiran xafaayad keliya. Waa hab aad ku yeelan karto caano badan oo waa si aad farxad ku heleysaan adiga iyo nuunnehaaga.

## Caanahaygu ma ku filan yihiin in uu nuunnuhu ku weynaado?

- Marka ay jiraan ilma ku dhasha dhicisnimo, waxa ay u baahan karaan in loo kordhiyo nafaqada ay ka heleyaan caanaha hooyada. Dhakhaatiirta iyo xirfadleyaasha nafaqada ee isbitaalka ayaa hooyada ku caawin kara go'aanka ah haddii iyo goorta uu nuunnuhu u baahan yahay nafaqo dheeraad ah.

## Sidee baa la iigu caawin karaa in aan nuunnehayga u helo caano badan?

- Waa in hawl adag loo maro si ay hooyadu caano badan ugu yeelato marka uu nuunne ugu dhasho dhicisnimo, laakiin waa wax muhiim ah!
- Kalkaalisada ama la-taliyaha nuujinta kala hadal haddii aad dhib ku qabto inaad mashiinka caanaha isaga listo 8 jeer ama wax ka badan maalintii.
- Qoyska iyo asxaabta kala hadal in ay kugu caawiyaan sameynta cuntooyinka fudud iyo cunto caadi ah, inay kugu caawiyaan shaqada guriga, carruurta iyo arrimaha kale, ama xataa in aad ka hesho dhiirrigelin.

